Shaxda Imtixaanka NAPLAN ee 2011

	Talaadada 10 May	Arbacada 11 May	Khamiista 12 May
Fasalka 3aad	Xeerarka Luqadda 40 daqiiqo Qoraalka 40 daqiiqo	Aqriska 45 daqiiqo	Xisaabta 45 daqiiqo
Fasalka 5aad	Xeerarka Luqadda 40 daqiiqo Qoraalka 40 daqiiqo	Aqriska 50 daqiiqo	**Xisaabta** 50 daqiiqo
Fasalka 7aad	Luqadda Cawaacidda 45 daqiiqo Qoraalka 40 daqiiqo	Aqriska 65 daqiiqo	Xisaabta Kalkulaytar 40 daqiiqo Aan Kalkulaytar lahayn 40 daqiiqo
Fasalka 9aad	Xeerarka Luqadda 45 daqiiqo Qoraalka 40 daqiiqo	Aqriska 65 daqiiqo	Xisaabta Kalkulaytar 40 daqiiqo Aan Kalkulaytar lahayn 40 daqiiqo

- **Xeerarka Luqadeed** waxaa ka mid ah hikaadinta, naxwaha iyo shaqalka.
- **Xisaabta** waxaa ka mid ah tirada, booska, aljabrada, fanshanka iyo qaabka, qiyaasta, fursadda iyo dhaatada.
- **Kalkulaytaradda** LAMA ogola imtixaanka xisaabta ee Fasalka 3aad iyo 5aad. Fasalka 7aad iyo kan 9aad, waxaa jira hal imtixaanka Xisaabta markaas oo isticmaalka kalkulaytarka la ogol yahay iyo mid aan la ogolayn.

NAP NATIONAL ASSESSMENT PROGRAM
www.naplan.edu.au
(BARNAAMIJKA QIIMAYNTA QARAN EE)

acara AUSTRALIAN CURRICULUM, ASSESSMENT AND REPORTING AUTHORITY
www.acara.edu.au
(HAY'ADDA MANHAJKA, QIIMAYNTA IYO WARBIXINTA EE AUSTRALIA)

NAPLAN 2011

BARNAAMIJKA QIIMAYNTA QARAN

Aqris-Qoraalka iyo Xisaabta

Macluumaadka Waalidiinta

Waa maxay NAPLAN?

Barnaamijka Qiimaynta Qaran – Aqris-Qoraalka iyo Xisaabta (NAPLAN) waa qiimaynta qaraneed oo sannadle ah oo loogu talogalay ardayda dhigata Sannadaha 3aad, 5aad, 7aad, iyo 9aad. Dhammaan ardaydaas dhigata heer sannadeedkaas waxaa laga filayaa inay ka qaybgalaan imtixaannada Aqriska, Qoraalka, cawaacidda Luqadeed (hikaadda, naxwaha iyo shaqalka) iyo Xisaabta. Dhammaan hay'adaha waxbarasho ee dowladda, iyo kuwa aan dowladdu lahayn waxay ka qaybgaleen horumarinta imtixaanada NAPLAN.

Maxay ardaydu u sameeyaan imtixaanka NAPLAN?

NAPLAN waa qiyaasta ay dowladda, hay'adaha waxbarashada, dugsiyada, macalimiinta iyo waalidiintuba ay ku ogaan karaan bal in dhalinyarada Australia ay gaareen natiijooyinka waxbarasho ee muhiimka ah ee ka jira aqris-qoraalka iyo xisaabta. Waxay kaloo dugsiyada, dowlad-goboleedyada iyo taritoriyada siiyaan macluumaadka ku saabsan sida barnaamijyada waxbarasho u shaqaynayaan iyo meelaha u baahan in la mudnaan siiyo xagga hagaajinta.

Imtixaannada NAPLAN waa hal qayb oo ka mid ah habka qiimaynta iyo warbixinta ee dugsiyada, baddalna uma noqdaan qiimaynaha ballaaran, oo jira oo ay sameeyaan macalimiinta kuwaas oo ku saabsan waxqabadka ilmo kasta.

Maxaa laysku imtixaani doonaa, sideese loo imtixaani doonaa?

NAPLAN waxay imtixaanta noocyada xirfadaha kuwaas oo muhiimka u ah ilmo kasta si uu ugu horumaro dugsiga iyo noloshaba, sida aqriska, qoraalka, hikaadinta, naxwaha iyo xisaabta. Waxa ku jira imtixaan kasta waxaa sheegta *Caddaynta Qaran ee Wax-barasho* ee Ingiriisiga iyo Xisaabta kuwaas oo saldhig u ah qaab-dhismeedka waxbarasho ee dowlad-goboleedka iyo taritoriga. Su'aaluhu waa kala – doorashooyin (multiplechoice) ama waxay u baahan yihiin jawaabo qoraal ah. Shaqada qoraalka ah waxay ardayda ka doonaysaa inay qoraan qoraal qancin leh.

Yaa qaadi doona imtixaannada?

Imtixaannada NAPLAN waxaa lagu qaadaa dugsiyada waxaana ilaaliya macalimiinta fasallada, maamu-ku-xigeenada iyo maamuleyaasha. Dowlad-goboleed iyo taritori kasta waxay masuul ka tahay sixidda imtixaanka ayadoo la raacayo hab-raacyo iyo habab.

Ma ku caawin karaa ilmahayga inuu isku diyaariyo imtixaanka?

Qiimaynta NAPLAN waxaa qaata ardayda ayadoo qayb caadi ah ka ah barnaamijkooda waxbarasho. Macalimiintu waxay hubin doonaan inay ardaydu u diyaargaroobaan imtixaanadaas waxayna bixin doonaan taageero iyo habraaca ku habboon. U-isticmaalka adeegyada bixiyeyaasha tababarada laguma talinayo. Habka ugu firfircoon oo laysugu diyaarin karo imtixaanada waa in la hubiyo in xirfadaha aqris-qoraalka iyo xisaabintuba lagu baro manhajka caadiga ah. su'aalaha sambalka ah iyo samablka qoraalka ah waxaa laga heli karaa Website-ka NAPLAN: www.naplan.edu.au.

Maxay yihiin taageerooyinka dheeraadka ah oo uu dugsiyadu siin karaan ardayda ay baahiyaha gaarka ah hayaan?

Dhammaan ardayda waxaa lagu dhiirigelinayaa inay ka qaybgalaan imtixaannada NAPLAN. Ardayda ay hayaan baahiyo gaar ah waxay xaq u leeyihiin qawaaniin gaar ah kuwaas oo muujinaya taageerada badanaa lagu siiyo fasalka dhexdiisa, ardayda ay hayaan dhaawac ku-meel-gaar ayagana si macquul ah ayaa wax loogu qabtaa.

Ka-reebista rasmiga ah ayaa la siin karaa ardayda qabta iinta dhantaalanka waxbarasho oo daran kuwaas oo dhawaanta yimid Australia kana yimid asal aan Ingiriisiga looga hadlin.

Hay'adda imtixaanka dowlad-goboleedkaaga iyo maamulaha dugsigaaga ayaa ku siin kara macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qawaaniinta gaarka ah ama habka looga baahan yahay si loo helo ka-reebista rasmiga ah.

Sidee baa loo qiyaasaa waxqabadka NAPLAN?

NAPLAN maahan nooca imtixaanka dhicidda iyo gudbidda leh. Waxqabadka ardayga shaqsiga ah waxaa lagu muujiyaa qiyaasta waxqabadka qaran ee imtixaan kasta. Qiyaasta imtixaanka kasta waxay leedahay toban qayb ayadoo heerar sannadkana looga warbixiyo qiyaas isku mid ah. Lix qaybood ayaa looga warbixiyaa heer sannadeed kasta ee imtixaan kasta. Mid ka mid ah qaybahaas wuxuu ka joogaa heerka ugu hooseeya qaranka ee ardayda heer sannadeed kasta. Natiijo ahaan heerka ugu hooseeya qaranka wuxuu muujinayaa in ardaygu gaarey xirfadihii aqris-qoraalka iyo xisaabta oo looga baahnaa inbuu si buuxda uga qaybgalo heer sannadeedkaas. Waxqabadka arday kasta u gaarka ah waxaa la barbardhigi karaa waxqabadka celceliska ah ee ardayda oo dhan Australia.

Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu uu ka maqan yahay dugsiga maalmaha imtixaanka?

Intii suurtagal ahba, dugsiyadu waxay u diyaarin doonaan ardayda gaarka ah kuwaas oo ka maqnaa waqtigii imtixaanka si ay u galaan imtixaannadii dhaafay waqti kale ee inta lagu jiro asbuuca imtixaanka. Ardayda gaarka ah looma ogola inay imtixaannada u fariistaan ka gadaal Jumcaha 13ka May.

Miyaan heli doonaa warbixinta waxqabadka ilmahayga?

Warbixinta NAPLAN waxaa bixin doona dugsigaaga dhammaadka sannadka. Qaab warbixineed isku mid ah ayaa loo adeegsadaa arday kasta Australia. Dugsiga ayaa ku soo ogaysiin doona marka warbixinaha guriga loo soo diri doono. Haddii aadan helin warbixinta, waa inaad dugsiga la soo xiriirtaa. Natiijooyinka ardayga ee gaarka ah waa kuwa si adag qarsoodi u ah.

Sidee baa natiijooyinka imtixaanka NAPLAN loo isticmaalaa?

- Dugsiyadu waxay natiijooyinka u isticmaalaan si ay u ogaadaan meelaha barnaamijyada waxbariddu ku xoogan yihiin ama ku liitaan si hadafyo loogu sameeyo xagga aqris-qoraalka iyo xisaabta.
- Nidaamyada dugsiyadu waxay natiijooyinka u isticmaalaan si ay barnaamijyada dib-ugu-eegaan taageerona u siiyaan dugsiyada.
- Ardayda iyo waalidiintuna waxay natiijooyinka shaqsi u isticmaalaan inay kala hadlaan horumarka ardayga macalimiintooda.
- Macalimiintu waxay natiijooyinka u isticmaalaan inay si fiican uga caawiso inay ogaadaan ardayda kuwaas oo u baahan loolamo weyn ama taageero dheeraad ah.
- Bulshadu waxay ka arki kartaa natiijooyinka NAPLAN *My School* website.

Halkee baan ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan NAPLAN:

- Ka eeg www.naplan.edu.au
- La xiriir dugsiga ilmahaaga
- La xiriir hay'adda waxbarasho ee dowlad-goboleedkaaga ama taritorigaaga (faahfaahinta waxaa laga heli karaa website NAPLAN)